



**Xafiiska Qarammadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda
Soomaaliya (UNPOS)**

**Warqad ku socota xubnaha Jaaliyadaha Soomaaliyeed
ee Qurbaha ku nool (No. 21)**

Neyroobi, 06 Janaayo 2010

As-Salaamu Caleykum,

Saaxiibayaasha qaaliga ah,

1. Wuxaan dhammaantiina idii so gudbinayaan salaam diiran, waxaana idii rajaynayaan sannadkan 1431 ka iyo kan 2010 ka oo intaa ka sii nabad badan.
2. Bilashada sannadkan 2010 ka ma aha keliya billowga sannadka ee weliba waa billowga tobani sanno oo cusub. Sida dhammaan Soomaalida nabadda jecel iyo dhammaan dadkoo kale oo idin taageera, waxaa rajeynayaan in nabad iyo xasillooni ay ugu dambeyntii ka hirgalaan Soomaaliya sannadkan cusub dhexdiisa iyo gaar ahaan billowga tobanka sanno ee cusub. Dad badan oo adduunka ku nool waxay maalinta sannadka cusub uu bishay dejistaan ujeeddooyin shakhsii ah si ay u hormariyaan noloshooda. Markaa soo celinta gobanimo dhab ah, sharaf iyo billowga tobani sanno oo barwaqaqo leh aan ka dhiganno go'aan wadajir ah sannadkan 2010. Sidoo kale sidaan horey ugu sheegay warqadiihii aan idii so diray, weli waxaan rajaynayaan inay Soomaalidu ku dayan doonaan tusaalihii Nabi Muxammad (SCWS) ee Heshiiskii Hudaybiyah, (kamana xumi inaan sii wado inaan idin xusuusiyod dersiga muhimka ah ee uu leeyahay Heshiiskan.) Wuxaan rajeynayaan in isu-tanaasulid, iscafis iyo isumaasho ay ka guuleystaan iska horimaad hubaysan iyo kala fogaasho.
3. Marka aan hore u eegayno sannadka cusub, waa inaan sidoo kale gadaal eegnaa oo ann ku fikirnaa sannadkii 2009kii iyo gaar ahaan guulihii wax ku oolka ahaa ee la gaaray.
4. Markii la saxiixay Heshiiskii Jabuuti ee 2008, Barlamaanka ayaa la ballaariiyay bishii Janaayo 2009 waxaana la doortay Madaxweyne cusub, Sheekh Shariif Sheekh Axmed. In ka yar bil kadibna waxaa la magacaabay Ra'iisal Wasaare cusub waxyar kadibna waxaa la dhisay Xukuumad.. Labada iyo Barlamaanka iyo Madaxweynahaba waxay u guureen magaalada Muqdisho. Xukuumaddu waxay hadda jiirsatay hal sanno, inkastoo ay weerar ku hayaan xoogag xagjir ah oo dibadda laga soo maalgeliyo, oo ay weliba dadka qaar ay odorasayeen inaan sii jiraynin, mana saameynin inqilaabkii la isku dayay bishii May.

5. Bishii Abriil 2009, Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu furay kulan heer sare ah ee Bulshada Caalamka oo ay isugu yimaadeen hoggaamiyeyaasha Midowga Afrika, Guddiga Yururb, Midowga Yurub, Jaamacadda Carabta, Ururka Caalamka Islaamka, Qaramada Midoobay iyo Bangiga Adduunka, iyo weliba wakiillo ka socda 60 waddan iyo ururro kale oo badan. Ujeeddada shirku waxay ahayd in la taageero nabadgelyada Soomaaliya, waxaana halkaa lagu ballanqaaday lacag gaaraysa 213 milyan oo doolar oo lagu bixinayo ciidanka nabadgelyada Soomaaliya iyo hawlgalka Ciidanka Nabadilaalinta Midowga Afrika (AMISOM). Inkastoo heerka bixinta lacagtaasi ay hooseyso, haddana arrintaasi waxay ahayd taageero aan hore u soo marin dalkiina.

6. Sannakii 2009kii waxaan shir-guddoomiyay afar shir oo ay Bulshada Caalamku u qabatay Kooxda Caalamiga ee la Xiriirka Soomaaliya – kii ugu dambeeyayna wuxuu ka dhacay magaalada Jidda (Sacuudi Carabiya) 17kii Disembar ee 2009. Shirkan oo uu martigeliyay Ururka Caalamka Islaamka, kana soo qaybgalay Ra'iisal Wasaaraha Soomaaliya, wuxuu soo dhoweeyay horumarka la taaban karo ee ay gaartay Dowladda Ku Meel Gaarka iyo qorshaheeda mustaqbalka, sidoo kale wuxuu soo dhoweeyay sida ay dowladdu uga go'antahay inay sii waddo la xiriirka Soomaalida u diyaar ah joojinta colaadda iyo horumarinta nabadda.

7. Guud ahaan, sannadkii 2009kii Dowladdu waxay gaartay guulo wax ku ool ah. Wuxaan ka mid ahaa dowladda oo sare u qaadday awoodda ay ku dhisayso maamulka asaasiga ah, gaar ahaan dejinta miisaaniyadda, oo ahayd tii ugu horeysay muddo shan sanno ah, qoridda iyo tababarka ciidamo dheeraad ah, dibuhabaynta hay'adaha nabadgelyada, xoojinta wasaaradaha iyo wadashaqayn iyo xog isdhaafsi qoran oo ay ugu jawaabayso codsiyada bulshada caalamka ee saldhigeedu yahay Nayroobi. Xukuumaddu waxay mar kale hawada ku soo celisay Idaacadda Raadiyo Muqdisho iyadoo addegsanaysa hantideeda gaarka ah, taasoo ka dhigaysa qalab muhim ah oo ay kula xiriirto dadkeeda, halkaasna kaga saareyso warxun faafinta. Isla markaana waxaan jeclaan lahaa inaan Xildhibaannada ugu baaqo inay ilaaliyaan Barlamaanka oo aysan waqtii qimo badan ku luminin mooshino aan waxtar ahayn oo lagu doonayo in lagu rido Golaha Wasiirrada, Guddoomiyaha Barlamaanka iwm. Soomaaliya waxay ku jirtaa xaalad degdeg ah. Xildhibaannadu waa inay dhowraan mabaadi'da wax ku oolka ah. Sidoo kale Bulshada Caalamku waa inay ka soo baxdo xilka ka saran Xildhibaannada.

8. Waxaa kaloo dhacay weerarro naxdin leh oo ay soo qaadeen kooxo xagfir ah – gaar ahaan qaraxii ismiidaaminta ee argagaxa lahaa ee 3dd Diisembar oo lagu weerar xafladdii qalinjebinta ardadii kulliyadda caafimaadka, halkaasoo lagu laayay dhakhaatiirtii mustaqbalka Soomaaliya iyo eheladdodii oo ay weheliyaan dhakhaatiir, weriyeyaal, iyo saddex wasiir. Weerarkan lagu qaaday jaamacadda, oo ay maalgeliyeen qaar ka mid ah dadkiina qurba joogta ah, wuxuu si aan hore loo arag u mideeyay dhammaan Soomaalida joogta gudaha iyo dibaddaba, si ay uga hortagaan colaadda iyo dhiigga qubanaya. Codkoodu wuxuu ku midaystaa diidmada dilka, taasna waa farriin nagu hagaysa sannadkan 2010. Mar kale waxaan ugu baaqayaa hoggaamiye dhaqameedyada, ganacsatada, haweenka, iyo dhallinyaradaba inay ku midoobaan diidmada ay kaga horgeedaan dilka dadka aan waxba galabsan.

9. Waxaa si gaar ah u xanuun badan in ninka ka dambeeyay halaagan intaa la eg uu ahaa nin Soomaali ah oo degan waddanka Denmark. Ma ahayn ninkii ugu

horreeyay ee kadib markii dibadda lagu siiyay magangelyo ku soo coqda Soomaaliya si uu u daadiyo dhiigga muwaadiniinta dalkiisa. Ninkii geystay qaraxii ismiidaaminta ahaa ee ka dhacay magaalada Boosaaso sannadkii 2008 wuxuu ahaa nin Soomaaliyeed oo Ameerikaan ah oo ka yimid Minnesota. Wuxaan intaa kadib aragnay weerarkii isku dayga ahaa ee toddobaadkii la soo dhaafay ka dhacay magaalada Aarhus, ee dalka Denmark, isku daygaas oo uu ku kacay nin Soomaaliyeed oo ku nool dalkaas. Dadka soo abaabulay dhallinyaradan waxay baabi'inayaan sumcadda Soomaaliya, waxayna ka qaybqaadanayaan masiibada sii xumaanaysa ee muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku nool gudaha iyo dibadda dalka. Kuwa qurbaha ku nool waxay u badantahay in lagu eego aragt shaki leh, kuwa dalka gudihiisa joogana soo dhoweyn dibadda kama heli doonaan.

10. Dhibaataada kale ee ay colaaddan leedahay waxaa weeye kuwa ka dambeeya falakan dilka ah kama shakiyaan inay si cad u sheegtaan mas'uuliyadda falalkooda. Sababtoo ah waxay muddo dheer haysteen la xisaabtan la'aan (impunity). Wuxaan la yaabanhay inaysan ka cabsanaynin ciqaab kaga timaadda xagga Eebbe ama maxkamadaha gudaha ama kuwo caalami ah. Si kastaba ha ahaatee, way iman doontaa, ha dhowaato ama ha fogato.

11. Cidna kuma eedeyn karto Bulshada Caalamka inay wax qabadkeeda u jeedisay dhanka nabadgeleyada iyo la dirirka argagaxisada oo ay ka jeedisay maalgelinta arrimaha kale. Sidaa daraadeed, sannadka 2010 dadka qurba joogta ah waxaa looga baahanyahay in sidii hore si ka badan uga qaybqaataan oo ay daboolaan kaalinta bannaan. Soomaaliya waa dalkiina, haddii aad si uun uga qaybqaadataan dhismaha dowladda, ma noqonayso keliya hanti la bixiyo ee waxay caalamka tusaysaa inaysan Soomaalidu ku tiirsanayn deeqda dadka kale. Deeqbixiyeyaasha dibaddana waxay u badantahay inay kaalmeeyaan markay arkaan Soomaalida oo iskaalmeynaya. Sidaan mar walba sheegi jiray, kun doolar oo hadda la bixiyo waxay in badan ka qiimo badantahay tobantun oo doolar oo lagu ballanqaado sannadka soo socda.

12. Wuxaan si dhab ah u rajaynayaa in sannadka cusub uu noqon doono sannad leh xasillooni fidda iyo nabad.

Walaalkiina,
Ahmedou Ould-Abdallah